



Hepatobiliary Scan (HIDA)

Bukaanka: _____ Taariikhda Balanta: _____

Waqtiga Imaanshaha: _____ subaxnimo/galabnimo Waqtiga Sawirkaka: _____ subaxnimo/galabnimo

Goobta: Daawada Nukleerka ee Mankato Clinic
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001

Fadlan soomar Xafiiska Diiwaangelinta kahor intaadan imaan barta Daawada Nukleerka.

Hadaadan awoodin inaad balanta ku timaado ama aad qabto wax su'aalo ah, fadlan wac 507-389-8519.

Waa maxay Sawirka Hepatobiliary:

Baaritaan waa qaab raajo qaadis ah kaasoo gacan kagaysta baarista dhibaatooyinka kudhaca beerka, kaadi haysta, iyo tuunbooyinka baylka. Baaritaanku wuxuu gacan kagaystaa helitaanka xanuunada iyo xaalada sida, caabuqa kaadi hasyta, xiranka tuunbada baylka, dhibaatooyinka kudhaca tuunbada baylka iyo dhibaatooyinka xiniinyaha kudhaca.

Sidee ayaan ugu diyaar garoobayaa baaritaanka:

- Kahor intaadan qabsan balanta baaritaankaaga, fadlan usheeg dhakhtarkaaga hadaad:
 - Naas nuujinayso, aad uur leedahay ama aad umalaynayso inaad uur qaadi karto.
 - Usheeg dhakhtarkaaga hadaad soomartay iskaanka PET/CT 48 saacadood ee ugu danbaysay.
 - Sonkoroow qabto. Dhakhtarkaaga ayaa kusiinaaya tilmaan ku aadan qaadashada daawoyinkaaga sonkoroowga. Daawoyinka qaar ayaa ubaahan inaad iska joojiso baaritaanka kadib.
 - Usheeg dhakhtarkaaga hadaad soomartay baaritaanada raajda kuwaasoo adeegsaday shucaaca barium 1-2 asbuuc kahor baaritaankaan.
- Waxaan soojeedinaynaa inaad laxariirto shirkadaada caymiska kahor intaadan balansan baaritaanka si aad ufahanto waxa caymiskaagu kaabixin karo baaritaankaan.
- Maalinta baaritaanka:
 - Hacunin hana cabin waxna muddo 4 saac ah kahor baaritaanka caafimaad. Waxyaabahaan kaareeban waxaa kujira daawada, xanjada, ama nacnaca adag.
 - Hacunin daawo ay kujirto maadada Morphine 24 saacadood kahor baaritaankaan.
 - Fadlan sookaxayso qof wayn oo gaariga kuukaxeeya hadii ay suuragal noqoto in lagu siiyo daawada Morphine si qaab faseex ah loogu arko kaadi haystaada. Hadii daawada Morphine lagu siiyo, ma awoodi doontid inaad gaariga gurigga u kaxayso.

Waxa dhacaaya inta baaritaanku socdo:

- Khabiirka raajada ayaa galinaaya tuunbada xidid (IV) garabkaaga ama gacantaada waxaana lagugu durayaa aalad radioactive ah oo lagaaga shubaayo tuunbada IV. Waxaad dhabardhabar ugu jiiifanaysaa miiska raajada waxaana lagaa codsanayaa inaad nuuxnuuxsan.
- Sawiro ayaa lagasoo qaadayaa qaarkaaga danbe ayadoo la adeegsanaayo kaamiro qaas ah mudo 60 daqiiqo ah.
- Daawada Z^{99m}Tc, Kinevac, ayaa lagaa siinayaa tuunbada IV. Qaar kamid ah bukaanada ayaa laga codsan karaa inay cabaan Ensure halkii laga siin lahaa Kinovac. Sawiro dheeri ah ayaa laqaadayaa muddo dheeri ah 30 - 60 daqiiqo ah.
- Baaritaanku wuxuu soconayaa wadarta guud 1.5 - 2 saacadood.

Tilmaamaha baaritaankaaga kadib:

- Dhakhtarkaaga ayaa kula wadaagaaya natiijoyinka baaritaankaaga marka lagaaro balantaada dabagalka ah. Hadaadan lahayn balan dabagal ah, dhakhtarkaaga ayaa qoraal kuusoo diraaya waraaq. Haduusan kulasoo xariirin, waxaad laxariiri kartaa xafiiska dhakhtarkaaga kadib 5 ilaa 7 maalmood baaritaanka martay si aad natiijadaada usoo qaadato.
- Khabiirka Raajada ayaa kaasaraaya IV da.
- Waxaad dib ugu laaban kartaa hawlahaaga caadiga ah islamarkiiba.